

INTERNATIONAL ELECTION OBSERVATION

Somaliland Elections

2024

Goobjoogayaasha Caalamiga ah ee Doorashooyinka Somaliland oo soo saaray Warbixintii Kama Dambaysta ahayd

20 March 2025

Goobjoogayaasha Caalamiga ah ee Doorashooyinkii Madaxtooyada iyo Ururrada Siyaasadda ee ka socday Jaamacadda UCL isla markaana kor-joogtaynayay doorashooyinkii 13 ka November 2024 ayaa soo saaray warbixintii kama dambaysta ahayd.

Goobjoogayaasha oo uu hoggaaminayay Tim Cole, oo ahaa Safiir hore oo Ingiriis ah, ayaa waxa ay martiqaad ka heleen Komishanka Doorashooyinka Somaliland si ay qiimayn dhexdhexaad ah oo madaxbannaan ugu sameeyaan hannaanka doorashooyinka. Guud ahaan, 28 goobjooge oo ka kala socda 13 dal ayaa goobjoogayaal ka ahaa hannaanka doorashooyinka ee dhamaan lixda gobol ee Somaliland. Goobjoogayaasha Caalamiga ahi waxa ay qabanayaan shaqadooda goobjoognimo si waafaqsan qawaaniinta caalamiga ah ee Goobjoogayaasha Caalamiga ah, kaas oo awoodda saaraya dhexdhexaadnimada goobjoogayaasha.

Xisbigii Mucaaradka ugu weynaa ayaa ku guulaystay doorashadii Madaxtooyada, waxaana la doortay xisbi cusub oo siyaasadeed oo ka qaybgeli doona doorashooyinka soo socda ee Somaliland. Goobjoogayaashu waxa ay la kulmeen doorashooyin si wanaagsan loo maamulay isla markaana ku qabsoomay si nabadgelyo ah, iyada oo natiijadana si weyn loo soo dhaweeyay.

Si kastaba ha ahaatee, doorashooyinku waxa ay daaha ka faydeen meelo ay tahay in wax laga qabto oo la xidhiidha hannaanka doorashooyinka marka loo eego heerarka caalamiga ah ee dimuqraadiyadda.

Goobjoogayaashu waxa ay warbixinta ku xuseen 26 talo soo jeedinood oo ujeeddadoodu tahay in lagu sii wanaajiyo doorashooyinka Somaliland iyo in lagu taageero dadaallada lagu gaadhsiinayo in ay si buuxda ula jaan qaadaan waajibaadka caalamiga ah iyo heerarka doorashooyinka dimuqraadiga ah.

Talo soo jeedimaha ugu muhimsan waxa ka mid ah:

- *Xaqiijinta in doorashooyinka Somaliland aan dib loo dhigin taas oo wax u dhimaysa xuquuqda dimuqraadiyadeed ee muwaadiniinta Somaliland*

- *In Meesha laga saaro in xisbiyada siyaasadda lagu koobo saddex keliya, lana oggolaado musharraxiin madax bannaani in ay tartami karaan*
- *In doorashooyinka soo socda ay codayntu ay noqoto mid u qarsoon qofka codaynaya si waafaqsan heerarka caalamiga ah*
- *In Komishanka Doorashooyinka Qaranku uu yeesho shaqaale joogto ah si loo ilaaliyo kaydka macluumaadka komishanka isla markaana kor loogu qaado doorashooyinka soo socda, iyada oo ay joogitaan rasmi ah ku yeelanayaan dhulka Somaliland oo dhan ilaa heer degmo.*
- *In dib u eegis lagu sameeyo nidaamka diiwaangelinta codbixiyayaasha isla markaana si joogto ah loo casriyeeyo si ay u suuragasho in tirada ugu badan ee dadku ay doorashooyinka ka qayb qaataan.*

Tim Cole waxa uu yidhi: “Waxa aanu Somaliland iyo Komishanka Doorashooyinkaba ugu hambalyaynaynaa sida ay ugu guulaysteen in ay qabtaan doorashooyin ku qabsoomay si deggan oo nabadgelyo ah. Weli waxa jira hawlo ay tahay in la qabto si doorashooyinka Somaliland loo gaadhsiiyo heerarka caalamiga ah. Annaga oo soo bandhigayna warbixintii kama dambaysta ahayd, waxa aanu rajaynaynaa in talo soo jeedintayadaasi noqoto mid waxtar leh isla markaana Somaliland ka caawisa geeddigeeda dimuqraadiyadda. Iyada oo doorashooyinkii Golaha Wakiilladu ay soo dhow yihiin, waa in hawshaas awoodda la saaraa, shaqadan muhiimka ahina ay halkaa ka sii socotaa.”

Warbixinta kama dambaysta ah ee Goobjoogayaasha Caalamiga ah ee Doorashooyinkii Somaliland ee 2024 waxa aad kala degi kartaa:

<https://www.ucl.ac.uk/consultants/news/2025/mar/ucls-latest-international-election-observation-mission-somaliland-launches-final>

https://www.ucl.ac.uk/consultants/sites/consultants/files/somaliland_november_2024_final_report_-_translated_exec_summary_recommendations.pdf